**Macluumaad ku saabsan daraasadda loogu talagalay mas'uuliyiinta/waalidiinta**

**Magaca daraasadda:**

SOTEPALA - bartilmaamaysiga adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka ee loogu talagalay carruurta jirta da'da dugsiga

**Codsashada ka qaybqaadashada cilmi-baarista**

Waxaan idinka codsanaynaa adiga iyo ilmahaaga inaad ka qaybqaadataan daraasad hadafkeedu yahay in lagu qiimeeyo waxtarka adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka ee carruurta. Hadafka ayaa ah in la soo saaro xog la cilmi-baaray oo loo isticmaali karo horumarinta iska-kaashiga arrimaha bulshada iyo caafimaadka iyo sidoo kale shaqeynta waxqabadyada waxbarasho/tacliimeed ee degmooyinka si loogu adeego carruurta iyo qoysaskooda si ka sii wanaagsan sida hadda jirta. Ogeysiiskani wuxuu qeexayaa cilmi-baarista iyo ka-qaybgalkaaga suurtogalka ah.

Xor baad u tahay inaad akhrido ogeysiiskan. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la xiriir qofka u xilsaaran daraasadda ama dhakhtarka cilmi-baarista (macluumaadka xiriirka waxaa laga heli karaa dhammaadka dukumentiga).

Haddii aad go'aansato inaad ka qaybqaadato daraasadda, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foom oggolaansho-bixineed oo gaar ah.

Guddiga anshaxa cilmi-baarista ee HUS ayaa soo saaray ra'yi wanaagsan oo ku saabsan qorshaha cilmi-baarista.

**Ka qaybqaadashada ikhtiyaariga ah, ka joojinta ka qaybqaadashada iyo ka noqoshada oggolaanshaha**

Ka-qaybgalka daraasaddan waa ikhtiyaari. Waad diidi kartaa inaad ka qaybqaadato daraasadda, waxaad hakin kartaa ka qaybqaadashadaada ama waxaad ka noqon kartaa ogolaanshahaagii hore ee kaqeybqaadashada daraasaddan adigoon bixin wax sabab ah wakhti kasta inta daraasaddu socoto iyadoon wax saamayn ah soo gaarayn ka xaadiritaanka dugsiga ee ilmahaaga ama xuquuqdaada ama xuquuqda ilmahaaga ee ah inaad heshaan taageerada ama daaweynta aad u baahan tihiin.

Haddii aad rabto inaad joojiso ka-qaybqaadashadaada daraasadda, fadlan la xiriir dhakhtarka cilmi-baarista.

Haddii aad go'aansato inaad ka noqoto oggolaanshahaaga, xogta lagaa uruuriyay adiga looma isticmaali doono qayb ka mid ah xogta cilmi-baarista ahaan, haddii ay suurtagal tahay in laga saaro xogta guud. Si kastaba ha ahaatee, xogta laga helay natiijooyinka cilmi-baarista ee horay loo falanqeeyay ama loo daabacay lama tirtiri karo.

**Maxaa la baarayaa oo waa maxay sababta**

Ujeedada daraasaddan ayaa ah in la ogaado nooca xirmada adeeg ee ay sameeyaan adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka, sida adeegyada loogu beegsado carruurta u baahan taageerada ee ku jira dugsiyada, iyo sida ardayda fasalka 5aad iyo 8aad iyo waalidiintooda/mas'uuliyiinta u qiimeeyaan faa'iidooyinka xafiiska dhakhtarka dugsiga.

Cilmi-baaris ku saabsan mowduuca waa muhiim, sababtoo ah ma jiro waddan kale oo leh daryeel caafimaad oo isku mid ah iyo daryeel kale oo loogu talagalay ardayda. Walaacyo ayay sidoo kale laga muujiyeen dadweynaha, walaacyadaas oo ku saabsan in wadashaqeynta daryeelka ardayda iyo dugsiyada ay xumaatay ka dib markii la sameeyay aagagga samaqabka.

**Sida loo cilmi-baarista loo sameeyo**

Ardeyda fasalada 5-aad iyo 8-aad iyo waalidiintooda ee dhigta dugsiyo ku yaala degmooyin badan oo koonfurta

Finland ah ayaa lagu martiqaadayaa inay ka qaybqaataan daraasadda.

**Adiga iyo ilmahaaga, ka qaybqaadashada daraasadda waxay la macno tahay inaad buuxisaan sahan elektaroonig ah oo gaaban ka dib markaad ka xaadirtaan ballanta dhakhtarka dugsiga**. Foomka waxaad kaga jawaabi kartaa taleefan ama kumbuyuutar. Waxay qaadataa ilaa 5 daqiiqo in la buuxiyo sahanka. Ka-qaybqaadashada daraasadda uma baahna diyaar-garow hore.

Inta lagu jiro baaritaanka, adiga ama ilmahaaga la idin kuma samayn doono tallaabooyin teerabiyo ah.

Foomka ogolaansho-bixinta, waxaanu sidoo kale kugu waydiisanaynaa ogolaansho inaad noo siiso inaan jawaabaha sahanka ku lifaaqno macluumaadka sanad dugsiyeedkan ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga (baahida loo qabo taageerada gaarka ah ama la xoojiyay, buundooyinka imtixaanada iyo ka maqnaanshaha dugsiga) iyo diiwaanada daryeelka bulshada iyo caafimaadka (cudurada ilmaha, xubin ka noqoshada adeegga la-taliyaha dugsiga ama cilmi-nafsi yaqaanka, tirada booqashooyinka xarunta caafimaadka iyo xiriirka adeegga daryeelka bulshada ee ilmaha). Ujeeddadu waa in la qiimeeyo sida adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka loogu beegsado carruurta u baahan taageerada ee dhigta dugsiga. Intaa waxaa dheer, waxaan qiimeyneynaa haddii carruurta macaamiisha ka ah adeegyada daryeelka bulshada ay helaan adeegyada caafimaad ee ay u baahan yihiin.

**Yaa sameeyay cilmi-baarista iyo cidda maalgelisay**

Daraasadan waxaa fuliyay aagagga samaqabka ee Länsi Uusimaa,

Qofka daraasadda u xilsaaran waa Silja Kosola, PhD, madaxa cilmi-baarista ee Länsi-Uusimaa, oo mas'uul ka ah ilaalinta xogta laga helo daraasadda.

Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Caafimaadka ayaa bixisay maalgelinta cilmi-baaristan taas oo ka timid Barnaamijka Kobaca Joogtada ah ee Midowga Yurub (RRP). Maalgelintu waxay daboolaysaa kharashaadka ururinta agabyada cilmi-baarista iyo kharashyada mushaharka shaqaalaha cilmi-baarista.

**Faa'iidooyinka iyo khataraha suurtagalka ah ee cilmi-baarista**

Ma jirto faa'iido aad si toos ah adiga ama ilmahaaga uga helaysaan ka qaybqaadashada daraasaddan. Si kastaba ha ahaatee, macluumaadka laga helo cilmi-baarista wuxuu gacan ka geysanayaa horumarinta adeegyada bulshada iyo caafimaadka kuwaas oo si fiican uga shaqeeya aragtida macaamiisha iyo in la xaqiijiyo in wadashaqeynta dugsiyada sidoo kale la xoojiyo iyada oo la tixgelinayo danaha macaamiisha. Iyadoo lagu salaynayo natiijooyinka cilmi-baarista, rajadu waxay tahay in adeegyadu aysan kala qaybsami doonin balse ay noqon doonaan kuwo wadajir ah.

Daraasadani waxba idin ma yeeli doonto adiga iyo ilmahaaga. Haddii sahanka ay ka soo baxaan natiijooyin la yaab leh, dhakhtarka samaynaya baaritaanka ayaa qiimeyn doona muhiimadooda wuxuuna kula soo xiriiri doonaa haddii loo baahdo.

**Aasaaska sharciyeed ee cilmi-baarista iyo ka shaqeynta xogta shakhsi ahaaneed iyo qarsoodinimada xogta**

Daraasaddan, sharciga ilaalinta xogta shakhsi ahaaneed iyo mida cilmi-baarista ee Finnishka ayaa lagu dabaqayaa. Cilmi-baarayaasha iyo shaqaalaha kale ee cilmi-baarista waxaa ka go'an inay raacaan dhaqanka cilmiyeed ee wanaagsan iyo tilmaamaha anshaxa cilmi-baarista. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan aasaaska sharciga ee cilmi-baarista ayaa ku yaala dhamaadka siideyntan.

Macluumaadka iyo natiijooyinka cilmi-baarista ee la idin ka uruuriyey adiga iyo ilmahaaga waxaa loo maamulayaa si qarsoodi ah sida sharcigu farayo. Dhammaan dadka gacanta ku haya xogtaada waxa ku xiran sharciga ilaalinta qarsoodinimada xogta. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka shaqeynta xogtaada gaarka ah iyo xuquuqdaada ka heli kartaa dhamaadka ogaysiiskan.

**Macluumaad dheeraadka ah iyo dadka lala xiriirayo**

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto daraasadda, waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka cilmi-baarista ama shaqaalaha kale. Waxaad kala hadli kartaa arrimo kasta oo ka soo bixi kara daraasadda inta lagu jiro cilmi-baarista kuwaas oo ku dhibaya.

**Qofka mas'uulka ka ah cilmi-baarista**

Silja Kosola, MD, Khabiir, Agaasimaha Cilmi-baarista

Aagga Samaqabka West Uusimaa

silja.kosola@luvn.fi

taleefanka. 040 353 3758

**Baaraha guud**

Sanna Salonen, LL, Shaqaale Cilmi-baariseed

Aagga Samaqabka West Uusimaa

sanna.salonen@luvn.fi

**OGOLAANSHO BIXINTA**

**Oggolaansho ka bixinta ka qaybqaadashada daraasadda**

Aniga iyo ilmahayga waxa nala waydiistay in aanu ka qaybqaadano daraasadda: Beegsiga adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka ee carruurta jirta da'da dugsiga (Daraasadda SOTEPALA).

Waxaan helay warbixin ku saabsan daraasadda muuqaal ahaan iyo qoraal ahaan labadaba waanan fahmay wixii la ii sheegay. Waxaan cilmi-baarista ka ogahay in igu filan.

Waxaan fahamsanahay in ka-qaybqaadashada daraasaddan ay tahay ikhtiyaari. Waxaan joojin karaa ka qaybqaadashadayda iyo ka qaybqaadashada ilmahayga marxalad kasta oo ay daraasadu marayso aniga oo aan bixinin wax sabab ah. Waxaan sidoo kale xaq u leeyahay in aan ka noqdo oggolaanshahayga wakhti kasta ka hor dhammaadka daraasadda. Waan ka warqabaa in, inkasta oo iska joojinta ka qaybqaadashada iyo/ama ka-noqoshada oggolaanshaha ka qaybqaadashada, macluumaadka laga soo uruuriyay ilmahayga loo isticmaali doono qayb ka mid ah cilmi-baarista ilaa xadka lagama maarmaanka u ah si loo xaqiijiyo isku-hallaynta cilmi-baarista. Diidmada ka qaybqaadashada daraasadda, iska joojinta ka qaybqaadashada ama ka noqoshada ogolaanshaha ka qaybqaadashada ma saamaynayso booskayga ama booska ilmahayga ee ka macmiilka daryeelka caafimaadka ahaan.

Taariikhda __________________________________

Magaca __________________________________

Taariikhda dhalashada __________________________________

Cinwaanka guriga __________________________________

Saxeexa __________________________________